NATUR VÅRDS VERKET

Allemansrätten

Information till invandrare på somaliska.

XAQA ISTICMAALKA DHULKA GAARKA AH EE ISWIIDHAN

Wuxuu qof waliba xaq u leeyahay inuu dabeecadda Iswiidhan dhexgalo, xataa dhulka gaarka ah. Waxaanna taas lagu magacaabaa xaqa isticmaalka dhulka gaar. Waana xorriyad wadata mas'uuliyad weyn oo lagu soo koobaan ereyada Wax ha arbushin – waxna ha burburin. Hoos waxaad ka akhrisan kartaa qoraal la soo koobay oo ku saabsan xaqa isticmaalka dhulka gaarka ah. Qoraal tifatiran oo ku saabsan xaqa isticmaalka dhulka gaarka ah oo ku qoran afafka Iswiidhishka, Ingiriiska iyo Jarmalka laga heli karaa bogga Wakaaladda Ilaalinta Dabeecadda (Naturvårdsverket) www.naturvardsverket.se . Waxaa halkaan lagu soo koobayaa qoraal af-Iswiidhish fudud ku qoran oo ku saabsan xaqa isticmaalka dhulka gaarka ah. Waxaa kaloo halkaan laga heli karaa qoraallo ku saabsan xaqa isticmaalka dhulka gaarka ah oo ku qoran afafka Iswiidhishka, Ingiriiska iyo Jarmalka.

Ku dhexsoco, bushkileeti ku dhexwado oo fardo ku dhexfuul

Dabeeacadda waad ku dhexlugeyn karaa oo bushkileeti ku dhexwadan kartaa oo fardo ku dhexfuuli kartaa. Waxaase mamnuuc ah in aad isticmaasho goof gaar loo leeyahay, dhul abuur ka beeran yahay ama dhul beeran. Goof gaar ah waxaa looga jeedaa dhul guriga ku agyaal oo qofka guriga deggani xaq ugu leeyahay inuu arbush la'aan ku isticmaalo. Waana inaad xirtaa albaabada kolka aad ka baxayso goof daaq oo aad dhexmarayso. Iska ilaali inaad bushkileeti ama fardo ku dhexfuusho wadiiqooyin carro jilicsan ama dhul kaloo carranugul. Waa inaadan kaloo ku dhexfuulin dhulka ciyaaraha jimicsiga iyo isboortiga barafka.

Baabuur iyo waddooyin gaar ah

Waxaa mamnuuc ah in baabuur, mootooyin iyo gaadiid kale lagu dhexwado dhulka dooxooyinka oo aan barafka lahayn. Dhulkaas waxaa ka mid ah dhammaan dhulka dooxooyinka ah sida dariiqyada, goobaha ciyaaraha iyo wadiiqooyinka lagu lugeeyo. (Waxaa la oggol yahay in mootooyinka barafka lagu wado haddii aysan kaynta iyo dhulka barafka ka hooseeya dhaawac ka soo gaareyn. Dhulalka qaarkood mootooyinka barafku gebi ahaan waa ka mamnuuc, ama waxaa loo oggol yahay oo qura jidadka mootooyinkaas loogu talagalay.) Waxaa kaloo mamnuuc noqon kara in gaadiid matoor ku shaqeeya lagu wado waddooyinka dadku gaarka u leeyahay. Waddooyinkaas waxaa ku agdhegsan astaamo mamnuucaya gelitaankaas. Waase lagu dhexlugayn kara oo bushkileeti lagu dhexwadi karaa jidadka gaarka ah.

Teendhooyinka iyo guryaha gaarida ku xiran

Waxaad dabeecadda habeen iyo maalin ka dhexdhisan kartaa teendho. Haddiise aad dooneyso inaad muddo badan degganaanto ama aad guri ka ag taagato, waxaad kolka hore ruqsad weyddiisaneysaa cidda goof iska leh. Inta aadan guri gaari jiidayo ag dhigan waddo gaar ah, idan ka qaado cidda iska leh. Lama oggola in lagu dhexwado guri gaari jiidayo dhul jilicsan sida xeeb ama dooxo doog ah.

Biyaha

Waxaad xaq u leedahay in aad xeebaha doon ku waddo, ku ag xirato waqti gaaban, ku lugeyso ama ku dabaalato oo aan ka ahayn dhulka u dhow guriga la deggan yahay. Fiira gaar ah u yeello in ay jiraa dhul loo gooyey oo lagu ilaaliyo shimbiraha iyo dhul kale oo ay mamnuuc ka tahay in biyaha lagu dabaasho ama dhulka lagu socdo. Dhulka noocaas ahna waxaa ku dhegsan astaamo.

NATUR VÅRDS VERKET

Allemansrätten

Kalluumeysiga
Waxaad xaq u leedahay in si xor ah oo kharash la'aan ah uga kalluumetsato dhammaan xeebaha badaha iyo shanta haro oo waaweyn oo Iswiidhan yaal adigoo isticmaalaya qalabka lagu kalluumeysto oo fudud. Si biyaha intaas dhaafsan looga kalluumeysato waxaa loo baahan yahay shati kalluumeysi ama ruqsad. Kalluumeysiga la oggol yahay waxaan ku jirin kalluumeysiga lagu jillaabto shabakadaha, doonyaha iyo qalabyada kaloo kale. Waxaan kaloo la kalluunsan karin kalluun nooca lax ama salmon oo ku nool xeebaha Norrland.

Eyda iyo ugaarsiga
Faraha ka qaad godadka iyo buulasha xayawaanka oo ubadkooda ammaan sii. Waxaa mamnuuc ah in la rabsho ama dhaawac loo geysto xayawaanka. Waxaa kaloo aan la oggolayn in eyda lagu siidaayo oo ay dhexordaan dabeecadda inta u dhexeysa 1da Maarso ilaa 20ka Agoosto kolkaasoo ah kolka xayawaanku ubadka dhalo. Xataa waqtiyada kale waa in eyga laga warhayaa oo la ilaaliyaa kolka uu dabeecadda ku dhexjiro. Waxaa caadi ah in dhul badan oo furan iyo jasiirada eyga lagu xiro meel.

Dab
Waxaa mamnuuc ah in waqtiga kuleylaha dab la shido. Kolkaasna waxaa mamnuuc ah dhammaan dababka furan – xataa meelaha loogu talagalay in dab lagu shido. Inta ka sokowse waxaa la oggol yahay in dab la shido iyadoo si taxadar ah looga warhayo. Dabka hubi oo aad u dami! Weligaa dab ha ku shidin buur dhakadeed – dabkaasi wuu fidaa oo dheereeyaa!

Miro, like iyo ubax
Waxaad guran kartaa miraha, likaha iyo ubaxa iskii u baxa oo aan sharcigu mamnuucayn. Waxaase mamnuuc ah in la gooyo ama dhaawac loo gesyto dhir ama laamo la jebiyo ama dhirka diirka laga xoqo ama dhaawac kale loo gesyto geed soo baxaya iyadoo aan ruqsad loo haysan.

Gur qashinka!
Waxaa mamnuuc ah in qashin lagu tuuro ama looga tago guryaha dibeddooda. Qarshooyinka lagu jejibiyo, qasacyada, bacaha, qalabka lagu kalluumaysto iyo dhammaan qashinka kale waxay foolxumeeyaan oo waxyeeleeyaan dabeecadda iyo ku dhexnoolaadkeeda. Waxay kaloo waxyeeleyn karaan dadka iyo duunyada labadaba.

Dabeecadda sharcigu ilaaliyo
Dhulka sharcigu ilaaliyo oo ay ka mid yihiin beeraha qaranka iyo seerooyinka waxaa lagu maamulaa sharci kale oo xaddadaya xaqa isticmaalka dhulka gaarka ah. Waxaa kaloo dhulka seerooyinka ka yaalliin ka jiri kara xeerar kale oo hoose. Astaantaani waxay u taagan tahay dabeecad sharcigu ilaaliyo.

Warbixin dheeraad ah
Haddii aad dooneyso warbixino intaa dheer iyo xeerarka ay ku saabsan yihiin, waxaad kolka hore la xiriireysaa degmada aad ku nooshahay.